**Warkii Ugu Dambeeyey ee Miisaaniyada iyo Talaabooyinka Xiga ee Dugsiyada Dadweynaha Seattle**

Qoysaska, Shaqaalaha, iyo Bulshada SPS ee Qaayaha leh,

Waad ku mahadsan tihiin dadaalkiina hagar la'aanta ah ee ardaydeena iyo iskuuladayada. Waxaan si aad ah ugu mahadcelineynaa taageeradiina joogtada ah iyo sida ey idiinka go'antahay inaad na garab istaagtaan inta eynu dhaafeyno xiligan adag.

Isku dheelitirka miisaaniyadeena maaha hawl fudud, gaar ahaan maadaama ay ina soo food saartay hoos u dhac weyn. Si kastaba ha ahaatee, hadafkayaga hagitaanku waa mid cad: hubinta in arday kastaa ku helo waxbarasho heer sare ah jawiga kobcinaya waxbarashada iyo koritaanka.

**Loolankeena Miisaaniyadayada**

Si la mid ah degmooyin badan oo ka tirsan gobolka iyo qaranka, Dugsiyada Dadweynaha Seattle (SPS) waxay la halgamayaan miisaaniyad yaraan joogto ah. Diiwangelinta hoos u dhaca—oo ay ku kacdo kor u kaca qarashka guryeynta, saameynta joogtada ah ee COVID, iyo u wareegida waxbarashada guriga ku saleysan iyo dugsiyada gaarka ah—ayaa sii xoojisay arinta. Intaa waxaa dheer, maalgelinta gobolka ee dugsiyada dadwaynaha ayaa sii socota inay hoos u dhacdo.

Waxaan isku aragnaa xaalad dhaqaale oo halis ah. Iyadoo ay jiraan caqabadahan, SPS waxay ahaanaysaa meel ay heer sare ka gaadho. Waxaan si sharaf leh ugu adeegnaa ku dhawaad 50,000 oo arday, anagoo bixinayna khibrado tacliineed oo kobcinaya, waxqabadyada manhajka ka baxsan, iyo adeegyada muhiimka ah ee waxbarashada gaarka ah. Hadafkayagu waa inaan ilaalino fursadahan oo aan hubinno arday kasta, dugsi kasta, inuu helo waxbarasho tayo sare leh iyo taageerada ay u baahan yihiin si ay u koraan.

**Dhabbaha Eynu Ku Socono**

Waxaan ognahay in qaar badan oo idinka mid ah ay la kulmeen niyad-jab ka dib markii aan ka shaqeynay go'aammadan adag, waxaanan ka mahadcelineynaa dareenkaaga iyo jawaab-celintaada. Waxaan wajahaynaa hoos u dhac dhan $94 milyan sanad dugsiyeedka 2025-26. Si taas wax looga qabto, waxaan wadnaa dhowr xeeladood:

**1. Isku-xidhka Dugsiga:** Ka dib markaan si taxadar leh u fiirsanay oo dhegaysanay tabashooyinkaaga, waxaanu ku soconaa qorshe yar oo aanu ku midayno afar dugsi sannad dugsiyeedka 2025-26.

Isku dhafkan waa qayb ka mid ah istaraatiijiyad weyn oo lagu xasilinayo dhaqaalaheenna. Marka la xidho afartan dugsi ee aan diiwaangashanayn, waxaan bilaabi doonaa inaan dhisno nidaam dugsi oo xoog badan, waara. Tani waa dariiqa ugu fiican ee lagu hubinayo in degmadeena ay sii wado bixinta waxbarashada tayada sare leh ee ardaydeena ay mudan yihiin.

Taladayda horudhaca ah ee u dirayo Guddida Dugsiga waxay noqon doontaa sidan soo socda:

- **Soodinta Waqooyi Galbeed:** Xiritaanka - Dugsiga Hoose ee North Beach Ku-Dhafidda Dugsiga Hoose ee Viewlands ee Viewlands
- **Soodinta Waqooyi Bari:** Xiritaanka - Dugsiga Hoose ee Sacajawea Ku-Dhafidda Dugsiga Hoose ee John Rogers ee John Rogers
- **Soodinta Dhexe:** Xiritaanka - Dugsiga Hoose ee Stevens Ku-Dhafidda Montlake Elementary ee Montlake
- **Soodinta Koonfur Galbeed:** Xiritaanka - Dugsiga Hoose ee Sanislo Ku-Dhafidda Dugsiga Hoose ee Highland Park ee Highland Park

Waxaan ogsoonahay in isbeddelkani uu adag yahay. Waxaanu ku dooranay dugsiyadan anagoo ku salaynnay arrimo ay ka mid yihiin xaalada dhismaha, baarax nimada, iyo yoolka lagu dhimayo carqaladaynta ardayda iyo qoysaska. Koox u heellan kala-guurka ayaa la shaqayn doona bulshooyinka ay saamaysay si loo hubiyo habsami u socodka iyo taageerada qof kasta oo ku lug leh.

Waxaan aqoonsannahay xiriirka qotoda dheer ee ay bulshadeenu la leedahay dugsiyadeeda, waxaana naga go'an hanaan hufan oo fikir leh. Laga bilaabo usbuuca soo socda, waxaanu ku qaban doonaa kulamo ka qaybqaadasho dugsiyada ay saamaysay, anagoo bixinayna taageero qof ahaan todobaadle ilaa Noofambar 23. Intaa waxa dheer, kulanka macluumaadka degmada oo dhan oo dhici doonaa Kamissta, Noofambar 14, laga bilaabo 6:30 ilaa 7:30 galabnimo.

**2. U doodista Taageerada Sharci-dejinta:** Waxaan si firfircoon uga raadineynaa taageero buuxda sharci-dejinta gobolka si aan gacan uga geysanno daboolidda miisaaniyad-yaridayada, gaar ahaan meelaha sida waxbarashada gaarka ah, gaadiidka, iyo kharashyada hawlgalka. Intaa waxa dheer, waxaanu u ololaynaynaa kordhinta daynta dhexdayada oo aanu raadinayno inaanu si buuxda uga faa'iidaysano awoodayada cashuuraha.

**3. Dhimista Xafiisyada Dhexe:** Si aan uga fogayno fasallada, waxaanu aqoonsanaynaa dhimista hawleed ee ka jirta xafiiskayaga dhexe, oo ay ku jiraan dib-u-habaynta shaqaalaha iyo hagaajinta.

**4. Beddelida Xiliga Jalaska (Gambaleelka) Dugsiga:** Waxaan u gudbi doonaa jadwal saddex heer ah oo gambaleelka dugsiga, kaas oo noo ogolaanaya inaan dhimno kharashka gaadiidka annagoo wadno bas badan oo basas yar leh.

**5. Cusboonaysiinta Cashuuraha Levies:** Bisha Febraayo 2025, waxaanu waydiisan doonaa codbixiyayaasha inay cusboonaysiiyaan laba cashuurood oo muhiim ah—Barnaamijyada Waxbarashada & Hawlgallada (EP&O) Levy iyo Heerka Sare ee Dhismaha (BEX VI) Levy—kuwaasi oo bixiya maalgelinta muhiimka ah ee hawlaha dugsiga iyo dayactirka.

**Dadaallada Kordhinta Diiwaangelinta**

Si loo soo jiito qoysas badan oo dib ugu soo noqda SPS, waxaan sameyneynaa daraasad diiwaangelin ah. Daraasaddan, oo la filayo inay dhammaato Disembar, waxay hagi doontaa dadaalladayada xagga qorista iyo sii-haynta, waxay naga caawin doontaa inaan dhisno bulsho xooggan oo firfircoon oo dugsi.

**Dhisida Mustaqbal Waara**

Dugsiyada Dadweynaha Seattle waxay jireen in ka badan 150 sano. In kasta oo ay tani noqon karto waqti adag, haddana waa in aan sii wadnaa raadinta xalal macquul ah. Tani waxay u baahan doontaa iskaashiga iyo taageerada joogtada ah ee bulshadeena.

Habkani wuxuu bilaabi doonaa inuu naga caawiyo xasilinta miisaaniyada sanadka soo socda. Waxaa iga go'an inaan sii wado wada hadalkan aan la yeelanayo qoysaska, shaqaalaha, iyo Guddiga Dugsiga anagoo ka shaqaynayna xalalka maaliyadeed ee waara. Si wadajir ah, waxaan u abuuri doonaa mustaqbal uu arday kasta oo dhigta Dugsiyada Dadweynaha Seattle uu ku horumari karo.

Waad ku mahadsan tihiin u helanaanta dugsiyadeena.

Daacadnimo,

Dr. Brent Jones
Kormeere Guud
Dugsiyada Dadweynaha Seattle